

# Qaadashada Tallaalka COVID-19: Dhalinyarada jirta 5-17 sano Nufeembar 2021



## Pfizer-BioNTech ayaa ah tallaalka kaliya ee loo oggolyahay inay qaataan dhalinyarada jirta da'da 5-17.

Maamulka Cuntada iyo Daawada ee Mareykanka (U.S Food and Drug Administration, FDA) ayaa wuxuu u oggolaaday in tallaalka Pfizer-BioNTech degdeg loogu talagalay in lagu talaalo carruurta jira 5-17 sano wuxuuna ogaaday inay faa'ido badan u leedahay carruurta ayadoo aysan jirin dhibaatooyin waawayn oo dhanka badqabka ah. Carruurta jira 5-11 sano ayaa heli doona kuuro talaal ka yar tan carruurta waawayn ee 12 sano jirka iyo dadka qaangaarka. Kuurada talaalka waxaa lagu saleeyay da'da ilmaha, oo laguma salayn miisaankooda. Talallada Pfizer-BioNTech waa in laga qaato labo kuuro, oo la bixinayo muddo saddex toddobaad ay u kala dhaxeeyso. Marka ay suuragal tahay, kuurada labaad waa in laga qaataa isla goobta tallaalka kuurada koowaad laga qaatay. Si aad u ogaato meesha canugaagu ka heli karo tallaalka Pfizer-BioNTech, booqo: <https://www.maine.gov/covid19/vaccines> ama wac 1-888-445-4111.

## Oggolaanshaha waalidka ama wakiilka ayaa laga rabaa dhalinyarada jirta 5-17.

- Waalidiinta ama mas'uuliyiinta ayaa oggolaanshaha ku bixin kara labo qaab:
  1. Iyaga oo soo waca iyada oo qof marqaati ah leenka kula jira oo uu dhageysanayo, sida ay qorsheyso goobta tallaalka laga bixiyo.
  2. Iyagoo oggolaansho qoraal ah oo warqad ku qoran ama elektaroonig ah ku bixinaya.
- Goob kasta oo tallaalka laga bixiyo waxaa yaallo foomka oggolaanshaha. Raac tilmaamaha soo gudbinta foomka ee ay bixisay goobta tallaalka.
- Shaqsiyaadka qaar ee jira ar da'da 18 sano jirka ayaa oggolaanshahooda tallaalka bixin kara. Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan booqo: <https://www.maine.gov/covid19/vaccines/public-faq>.
- Waxaa lagu taliyaa, balse qasab ma aha, in waalid ama mas'uul uu goobta joogo inta lagu jiro xilliga tallaalka. Marka laga hadlo dhalinyarada ay mas'uulka sharciga ah ka tahay waaxda DHHS, qofka dhalinyarada ah waxaa waajib ah inuu weheliyo shaqaalaha kiiska ama waalidka korsadaha ah, marka laga reebo haddii la joogo rugaha tallaalka ee dugsiga dhexdiisa ah, halkaas oo lagu taliyo, balse aan qasab ahayn, waalidka korsadaha ah ama shaqaalaha kiiska waa inuu xadir ahaado.
- Haddii ay suurogal tahay, dhalinyaradu waa inay ballantooda horay ay soo qaataan nooc aqoonsi. Haddii wax dukumiinti ah aan la heli karin, waalidiinta ama mas'uulka ayaa caddeyn karo xaq u yeelashada qofka dhalinyarada ah ee inuu qaato tallaalka.



## Tallaalka waxaa lagu bixiyaa si lacag la'aan ah.

Dawlada federaalka ah ayaa bixin doonta qarashka tallaalka canugaaga. Waa in aan laguugu soo dalicin ama aan biil laguugu soo dirsan, balse adeeg bixiyahaaga ayaa kaa codsan kara xogta ceymiskaaga ama kan canugaaga si uu uga codsado qarashka bixinta talaalka. Sidoo kale bixiyahaagu ma aha inuu kugu soo dalaco lacagta booqashada xafiiska haddii aad ugu tagto kaliya inaad tallaalka qaadato.

## Gaadiid raac bilaash ah ayaa la heli karaa.

Dadka reer Maine ee aan gaadiid lagu kalsoonaan karo heli karin ayaa waxaa dhici kara in gaadiid raac ay ku tagaan ballantooda tallaalka ku heli karo si bilaash ah, oo ay ka mid yihiin dhalinyarada jira da'daa 5-17 jirta. Marka koowaad in in la qabasado ballanta tallaalka, kadibna waxaad ku qabsan kartaa gaadiid raac inaad wacdo 1-855-608-5172 (Isniin ilaa iyo Sabti, 7:00am ilaa iyo 4pm) ugu yaraan 48 saacadood ballanta kahor. Bixiyaha gaadiidka wuxuu u baahan doonaa inuu sii ogaado haddii waalidka ama mas'uulka uu ballanta la tagi doono. Si aad u adeegsato adeeggaan gaadiidka, carruurta jirta da'aha 5-15 waa qasab inuu la socdo waalid ama mas'uul sharci ah. Waalidiinta ama mas'uulka qasab ma inay ku wehliyaan dhalinyarada jirta da'da 16 iyo 17 safaradooda. Adeegan gaadiidka looma heli karo rugaha caafimaadka ee gaariga dhexdiisa la isku talaalo.



## **Tallaalo nooce ah ayaa waqti xaadirkan loo oggolyahay in la siiyo dhalinyarada jirta da'da 5-17?**

Waqti xaadirkan, **kaliya** tallaalka Pfizer-BioNTech ayay FDA u oggolaatay in loo isticmaalo xaaladaha degdegga ah ee carruurta jira da'da 5-17. Tallaalka Pfizer-BioNTech ayaa ku yimaada labo kuuro oo kaladuwan, kuuro heer hoose ah oo lagu talagalay kuwa jira da'aha 5-11 iyo kuurada saraysa ee dadka ka wayn da'da 12 sano. Kuurada yar ayaa ah waxa loo adeegsaday tijaabada caafimaadka ee carruurta da'aha 5-11. Tallaalka wuxuu ku yimaadaa baakado midab kaleduwan ku leh si adeeg bixiyaashu u awoodaan inay ku kala gartaan farqiga u dhexeeya tallaalka Pfizer ee carruurta da'aha 5-11 sano iyo hal loogu talagalay dadka da'da 12 iyo ka wayn. *Tallaalada Moderna iyo Johnson & Johnson (J&J)/Janssen wali looma oggolaanin shaqsiyaadka ka yar da'da 18, balse waxaa ku socdo daraasad haddii mutaqbalka la ansixin karo.*

## **Yay tahay inuu qaato tallaalka COVID-19?**

In tallaalka la qaato ayaa ah habka ugu wanaagsan ee looga hortagi karo inuu kugu dhaco COVID-19. Waxaa lagu talinayaa in carruurta qaba taariikhda caabuqa hore ee COVID-19 sidoo kale la siiyo tallaalka COVID-19. Waa ikhtiyaarkaaga inaad tallaalka qaadato. Haddii aad go'aansato inaad tallaalka qaadato, waa inaad qofka ku talaalayo u sheegtaa haddii canugaagu:

- Uu horay uga qaaday falcelinta xasaasiyad oo daran
- Ay hayso qandho
- Qabo xanuun dhiig bax ama uu qaato dhiig khafiifiyeyaal
- Uu difaaca jirkiiisu liito ama qaato daawo saamayn ku leh nidaamkiisa difaaca
- Uu qaatay talaal kale oo COVID-19 ah

Waa inaad la hadasho dhakhtarka canugaaga haddii uu falcelin xasaasiyad oo daran ka qaado kuurada koowaad ee tallaalka Pfizer-BioNTech ama wax kasta oo uu ka sameysan yahay tallaalka kahor inta uusan qaadanin kuurada labaad.

## **Maxaa ku jira tallaalka COVID-19?**

Tallaalka Pfizer-BioNTech waxaa ku jira oo shaqeynaya messenger RNA (mRNA) oo ay la socdaan dufan, cusbo, iyo sonkor si loo ilaaliyo qeybta waxtarka leh ee tallaalka oo gacan looga geysto inay si wanaagsan wax uga qabato jirka. Ku ma dhexjiro fayraska COVID-19 oo nool, ama waxyaabo kale ee wax ilaaliyo ama shey kale. Qofka tallaalka ka ma qaadi karo caabuqa COVID-19.

## **Maxaa dhacaaya kadib marka canugaaga la talaallo?**

Waa in canugaagu sugaa 15 ilaa 30 daqiiqo kahor intaadan katagin goobta talaalka si dhakhtarka talaalay u caawiyo haddii uu xasaasiyad ku qabo ama haddii cilado kale ka dhashaan. Intaad sugaysaan, waxaad iska qori kartaa aalada v-safe si aad usoo sheegto dhibaatooyin kasta oo canugaagu ka qaadi talaalka oo aadna u hesho xasuusinta xiliga kuuradiisa xigta: [v-safe.cdc.gov](https://v-safe.cdc.gov).

**Waa wax caadi in aad isku aragto waxyeelooyin** hal ilaa iyo saddex maalmood kadib marka tallaalka la qaato.

Waxyeelooyinka ugu caamsan ee ka dhasha ayaa ah daal, murqo xanuun, xanuunka gacanta laga duray canugaaga, qandho, madax xanuun, xanuunka kala goosyada, qarqaryo, lallabo, ama matag. Kuwani waa calaamadaha sheegaya in tallaalka uu shaqeynayo. Haddii calaamadahaaga aysan ku bi'in saddex ilaa iyo afar maalmood gudahooda, la xiriiir dhakhtarka canug ama rugta caafimaadka. Adiga ama bixiyaha tallaalkaaga ayaa sidoo kale soo wargelin kara waxyeelooyinka Nidaamka Soo Wargelinta Xaaladaha Xun ee Ka Dhasha Tallaalka (Vaccine Adverse Event Reporting System (VAERS)): [vaers.hhs.gov/reportevent.html](https://vaers.hhs.gov/reportevent.html)

**Wac 911 haddii canugaagu xasaasiyad ka qaado kadib markaad ka soo tagtaan rugta caafimaadka.** Calaamadaha falcelinta xasaasiyadda waxaa kamid noqon kara neefsashada oo adkaata, bararka wajiga iyo canahaaga, wadna garaac degdeg ah, nabaro xun oo ka soo yaaca jirkiisa oo dhan, wareer, iyo laciifnimo.

**Hubso inaad ballan u qabsato kuurda labaad ee canugaga.** Wuxuu u baahan doonaa inuu ku soo noqdo saddex toddobaad gudahooda si uu u qaato kuuradiisa labaad.

**Kadib marka canugaaga la talaalo, waa inuu sii wadaa inuu xirto maaskaro, dadka kale ka fogaadaa lix dhudhun (labo mitir), kana fogaado meelaha la iskugu yimaado si uu u difaaco dadka aan wali talaalka helin.** Waxay qaadan doontaa labo toddobaad kadib marka canugaagu qaato kuuradiisa labaad ee tallaalka Pfizer-BioNTech inuu difaac buuxo ka helo COVID-19.

Waa amaan in la qaato talaalka hargabka iyo talaallada kale ee carruurta isla marka canugaagu qaadanaayo talaalka COVID-19.

**Booqo [www.maine.gov/covid19/vaccines](https://www.maine.gov/covid19/vaccines) si aad u hesho xog dheeraad ah. Waxaad sidoo kale ka wici kartaa khadka Taleefonka Tallaalka Bulshada ee COVID-19: 1-888-445-4111.**